

Ka Samayso Akoon PACE

PACE waa nidaamka waxbarashada onlaynka ah ee Guddiga Daryeelka Guriga ee Oregon (OHCC). Waxaad PACE u isticmaali kartaa inaad ku maarayso tababarkaaga OHCC. Hagahani wuxuu sharraxayaa sida **bixiyeyaasha daryeelka guriga** ay u abuuri karaan una hawlgelin karaan akoon PACE ah.

Haddii aad rabto in lagu caawiyo, ku dir iimayl tababar.ohcc@odhs.oregon.gov.

Tallaabada 1 - Tag mareegta PACE

Booqo: workspace.oregonstate.edu/ohcc


- Dhagsii gujo-raaca sare, ama
- Ku qor cinwaanka barta cinwaanka ee biraawsarkaaga.



Tallaabada 2 - Taabo badhanka gelitaanka

Dhagsii Gal Tababarka OHCC.

- Waa badhanka buluugga ah ee u dhow qaybta sare ee shaashadda.



Tallaabada 3 - Dooro sida loo galo


Waxaad ku soo geli doontaa cinwaankaaga iimaylka.

Waxaad isticmaali kartaa:

- Gmail
- Outlook
- Live
- Hotmail

Dooro badhanka u dhigma iimaylkaaga.

- Haddii aad isticmaasho Gmail, dhagsii **Ku Gal Google**.
- Haddii aad isticmaasho Outlook, Live, ama Hotmail, dhagsii **Ku Gal Microsoft**.



Ha gujin badhamada loogu talagalay shaqaalaha OHCC ama ardayda OSU.

Tallaabada 4 - Gal

Soo gal adoo isticmaalaya iimaylkaaga iyo fure-sireedkaaga.

Uma baahnid magac isticmaale ama fure-sireed gaar ah. Akoonkaaga iyo iimaylkaaga way isku xiriirsan yihiin.

- Geli cinwaanka iimaylkaaga, ama dooro iimaylka aad rabto inaad isticmaasho haddii aad leedahay hal wax ka badan.
- Raac tilmaamaha halhaleedka ee ku qoran shaashadda.
- Haddii aad aragto farriin ku weydiinaysa inaad oggolaato **Aqoonsiga Cirrus** si aad u gasho boggaaga iimaylka, dhagsii **Sii wad** ama **Aqbal**.

Tallaabada 5 –Oggolow Shuruudaha Adeegga

Marka aad tagto shaashada **Adiga Kugu Saabsan** ay ku qoran tahay:

- Hubso in cinwaanka iimaylkaagu sax yahay.
- **Ha** ku darin cinwaan iimayl kale.
- **Calaamadee sanduuqa** si aad u oggolaato Shuruudaha Adeegga.
- Dhagsii **Sii wad**. (Waa inaad hoos u dhaadhacdo si aad u aragto badhanka.)

Hadda waad gashay.

Marka xigta, waa inaad **hawlgeliso** akoonkaaga.

About You

This system is maintained by Ideal-Logic, LLC for Ideal-Logic. [Ideal-Logic Privacy Policy](#)

Name: **Example**

Email Addresses*

example@gmail.com

Why are you asking for multiple email addresses?

I agree to Ideal-Logic's [Terms of Service](#) and acknowledge Ideal-Logic's [Privacy Policy](#).
[Click here to view a brief summary of these terms.](#)

[Continue](#)


Tallaabada 6 - Gudbi Aqoonsiga Bixiyahaaga si aad u codsato hawlgelinta

Si aad u hawlgeliso akoonkaaga, soo gudbi **Aqoonsiga Bixiyahaaga**. Hirgelintu waxay qaadan kartaa ilaa **laba** shaqo maalmeed.

Ha gelin ama soo gelin waxba PACE ilaa akoonkaagu uu ka shaqaynayo. Haddii kale lama keydin doono.

[Home](#)

Oregon Home Care Commission

 **Step 1: Submit Your Provider Number**
Click to fill out the form.

Si aad u soo gudbis Tirsiga Bixiyahaaga:

- Marka aad tagto bog-xogeedka, dhagsii **Soo Gudbi Lambarka Bixiyahaaga**.
- Marka aad tagto shaashada **Foomka Cusub** ay ku qoran tahay, u gudub xagga sare ilaa qeybta **Degmada** aad ka gaadho.
 - Dhagsii **Oregon** si aad u aragto liiska degmooyinka.
 - Xulo degmada aad ku nooshahay.
- Marka xigta u gudub qeybta **Aqoonsiga Bixiyaha**.
 - Xulo nooca Bixiyahaaga.
 - Geli lambarka Aqoonsiga Bixiyahaaga.
 - Haddii aad leedahay wax ka badan hal nooc oo bixiye ah, xulo nooc kasta oo geli Aqoonsi Bixiye kasta.
- Dhagsii **Gudbi Foomka**.

Waa inaad shaashaddaada ku aragtaa farriin xaqiijinaysa in foomkaaga la helay.

Tallaabada 7 - Sug ansixinta

OHCC ayaa dib u eegi doonaan macluumaadkaaga oo ku hawlgelin doonaan akoonkaaga laba maalmood gudahooda.

- Iimayl ayaad **ka heli doontaa OHCC** marka akoonkaagu diyaar u yahay inaad isticmaasho. Iimaylka ayaa lagu soo diri doonaa cinwaanka aad u isticmaashay inaad ku gasho.
- Raadi iimayl wata mowduuca **“OHCC training account approved (Waa la ansixiyay akoonka tababarka OHCC).”**
- Haddii aadan arki karin iimaylka, ka fiiri galka iimaylada xun (spam) ama iimaylada aan la rabin (junk).

Tallaabada 8 - Xaqiiji in akoonkaagu shaqaynayo

Si aad u hubiso in akoonkaagu shaqaynayo:

- Dib u soo gal PACE.
- Bog-xogeedkaaga, ka raadi **Isku diiwaangeli Koorso**.

Haddii aad aragto ikhtiyaarkani, akoonkaagu wuu shaqaynayaa.

Hadda waxaad awoodaa:

- Inaad isku diiwaangeliso casharrada.
- Soo geliso kaararka ama shahaadooyinka Bakhti-afuufka (CPR) iyo Gargaarka Koowaad.

Haddii aadan arkin ikhtiyaarkani, akoonkaagu ma shaqaynayo. Weli waxba ha gelin ama ha soo gelin haddii kale lama keydin doono.

Haddii rabto in lagu caawiyo, ku dir iimayl training.ohcc@odhs.oregon.gov.